

Buugga

Hayaaan

Der-der Gelinta Nolosha

Qeybta Kowaad "1"

Qoraa:-Khaalid Dayib Muxumed"Xidig".

©2022

Xuquuqda Buuggan.

Xuquuqda buuggani waxay udhowrsanyihiin Qoraaga buugga, lama daabaacan, lamana guurin karo, lamana sheegan karo qeybo kamid ah iyadoonan ogalaansho laga heysanin qoraaga buugga.

TUSMADA BUUGGA

- Mahad-naq..... 5
- Hordhac..... 6
- 1. Mawduucyo ku saabsan Nolosha.
 - Fahamka Nolosha. 7
 - Waxyaabaha kaa caawinaya Fahamka Nolosha. 8
 - Ficilada Wanaagsan. 9
 - Ficilada Xun. 10
 - Horumarinta Nolosha..... 11
 - Is-beddelka Wanaagsan. 12
 - Is-beddelka Xun. 13
 - Waxyaabaha Hormuudka ka ah Horumarinta Nolosha. 14
 - wax-yaabaha saameynaya noloshaada..... 20
 - Riyoonka Nolosha..... 24
 - Waa maxay riyo?..... 24
 - Gun gaadha riyada..... 30
 - Ka dhabeynta Riyada..... 34
 - Soo koobidda buugga..... 43

Qoraa: khaalid dayib muxumed "xidig ".

1 May 2022, Sunday — 5 July 2022, Tuesday.

Mahad-naq.

Mahad oo dhan waxay usugnaatey Eebe S.W, naga yeelay dad muslimiin ah, sidoo kalena ii ogalaadey inaan qoro buggan,Waxaan umahad-celineynaa Eebe S.W markasta iyo xaalad kastaba.

Allaa mahad lahoo mudan ammaan waana loo magane
Rabbi baa macbuud xaq ahoo muran la'aaneede
Rabbi baa cibaadada mutoo lagu mideeyaaye
Rabbi baan midnimadiisa uga marag kaceynaaye
Rabbi baan musaawaad laheyn lala maseeyaaye
Rabbi baan tasbiih naga mudneyn amase miisaale
Rabbi baan mid uu sugo ta'wiil loo micneyn karine
Rabbi baan Mareykan iyo Ruush minid ku qaateene
Midduuse u qaddaray iyo inay madasha gaaraane
Rabbi baa musaamaxa addoon mudan cadaabkiiye
Rabbi baa makhluuqaadka idil Maaligooda ahe
Rabbi baa wuxuu kaa manciyo kala maqnaatiine
Rabbi baan muwaxid hoojineyn mowlanaa yiriye
Rabbi baan wixii loo martiyo oon macsi ahayne
Cidna kaga masuugayninoon muudal ku ahayn
Hadduu madal u yeeliyo hadduu markan noo dhiibo
Ama uu masiibooyin iyo balo ku maareeyo
Rabbi baa musiibo iyo kheyr maamuloo wada'e
Rabbi baan mid uu kuu qadaro maaro loo heline
Rabbi baan wuxuu maago duul maanacaa jirine
Rabbi baa kufaarta umarxama mararka qaarkoode
Oo miid u shuba say wanaag ugu maleeyaane
Aakhirana naar ay muteen geliya moolkeeda
Rabbi baan ninkii madaxa iyo maqada hoos joogta
Labadaba u kala miisayoon qolona moogeyne
Rabbi baa midiyahay sahdeen ma'aha saa yiriye
Nabigaa mutaabaca mutiyo maxabo dheeraada.....

Gabaygan waxaa tiriyey **Abwaan Abshir Bacadle**, waana gabayga uu ugu jeclaa gabayadiisa abwaanku.

Hordhac.

Buggan waa mid ku saabsan naftaada iyo sida aad ubaddeli karto noloshaada.

Buuggan iskama qorin, laakiin waxaan go'aansadey inaan qoro markaan arkey dhalinyaro badan oon aad ula yaabey ficiladooda iyo yoolasha ay ka leeyihiin noloshan ayaa igu qasabtay inaan qoro buggan.

Bugganna waa mid laga yaabo Inuu kaa caawiyo xaalado badan ood xal uga la'ayd, islamarkaana aad garan la'ayd meshaad ka bilowdo. Buuggan ani wuxuu iga yahay talo ahaan aan usoo bandhigey walaalaheyga noloshan adduunyo aan hadaf ka laheyn, noloshooduna laga yaabo inay noqoto mid xun ayaan ugu talo galay.

Runtii maha Buuggan mid aan maskaxdeyda ka qoray, lakiin waa xogo aan uruurinayey wakhti dheer buugaag badanna aan akhriyey, si aan wax uga ogaado inay saxsan yihiin waxan aan qorayo iyo inay khaldan yihiinba.

Marka laga hadlayo cilmi nafsiyeed, maha mid noqon karta keliya waxaad ku aragtey Naftaada, sidoo kalena maha mid aad iska qiyaasi karto dabadeedna aad iska qori karto. Cilmi nafsiyeedku waa takhasus ay dad inaga horreeyey iyo kuwa hadda joogaba inoosoo bandhigeen, iyagoo sameeyey baadhintaanno ku saabsan cilmigaas.

Cilmiga naftu wuu ka duwan yahay cilmiyada kale, sababtoo ah waxaa laga yaaba in baadhitaan lagu sameeyo Qof naftiisa iyadoonan la isticmaaleynin wax qalab ah, dabadeedna la ogaado xaaladda qofkaas uu ku suganyahay.

1. Mawduucyo ku saabsan Nolasha.

- Fahamka Nolasha.

Naftu waa ruux, taasoo Allah uu ku mannaystay Qof kasta(Gaal iyo Muslimba),waana amaano uu Allah S.W udhiibtey Addoomadiisa ilaa Wakhtiga Allah S.W ka qaadanyo amaanadaas.

Naftu waxay kamid tahay waxyaabaha kaa adkaanaya ilaa aad adigu ka adkaatoo moyee.

Hadii ay kaa adkaato naftaadu markasta waxaad noqon qof markasta ujeeda dhanka xumaanta.

Naftaadu waxay la leedahay saaxiibtinimo dhow shaydaanka,waaana ta keenaysa Hadii ay Naftaadu kaa awood badato inaad udhawaanayso xaggiyo shaydaanka,Taasi waxay kuu keeni kartaa inaad lloowdo Amaanadii Allah S.W kuu dhiibtey.

Nafteena waa laf-dhabarta inaan gudanno Amaanadii Allah S.W inoo dhiibtey, inoona fududeymaysa inaan markasta udhawaano kheyrka. Xaqiiqda Nafta ood ogaato waxaa inooga baxaya waxyaabo badan oo muhiim ah,waxaana kamid ah:-

- * inaan ka adkaano ficilada shaydaanka uu uhorseedayo Nafteena, kana dhow sanaano inuu nagaliyo mugdi inaan ka baxnano ay aad u adkaanyso.
- * inaad noqonayso qof ay ka suurtoobin in agtiisa lagu sameeyo wax hakin galinaya xawli socodka horumarinta Naftaada,Hammina ku beeraya inaad hoos udhac ku yimaado horumarkaaga.
- * inaad noqonayso qof ay ku beerantahay wanaag,aadna markasta ka fikirayso dadka kale ee ku jira Nolasha Xun,sidoo kalena ay wajigaaga ka muuqanayso wax-qabad iyo ujeeddo.
- * inaad bulshada dhexdeeda ka yeelato qof leh karti iyo sharaf, dadkuna ku jeclaanayaan aadna ku dhex yeelanayso magac iyo maamus.

Waxyaabaha Kaa Caawinaya Fahamka Nolosha.

Nolosha waxaa horseed unoqon kara waxyaabo fara-badan, waxaana isku dayaynaa inaan kasoo qaadanno waxyaabo faa'iido uleh Fahamka Nolosha:-

1:- Inaad Leedahay Imaan ku wada kuna hagi kara kaana fogeyn kara inaad yeelan weydo la qabsi. Tusaale:-

- gadhigu waa shay la maamulo, waxyaabaha lagu maamulayana ay ku jiraan gudihiisa.

haduu yahay gaadhigu mid iska socda oo lahayn wax joojiya, wuxuu noqon mid dhibaateeya noolayaasha, lakiin wuxuu leeyahay shay joojiya una sahlaya maamulaha kontoroolaya inuu wax dhib ah ugeysanin bulshada. Sidaas oo kale waa inaad yeelata wax ku hagi kara, ka istaajinaya xumaanta kuguna hagaya dhanka wanaaga, shaygaasna waa limaan dhab ah.

2:-inaad Xidhiidh la leedahay Allah S.W, waxay kuu sahlaysaa inaad fahamto ujeedada lagu abuuray, waxaad garan sidoo kale heerka a taagantahay noloshaadu, iyo inaad gudatay shuruuddii lagaa rabay ee ahayd inaad xidhiidh la leedahay Allah S.W.

3:- Inaad ka fogaato waxa dib-udhac ku keenaya inaad fahanto Noloshaada uguna horreyaan Hawadaada iyo Shaydaanka. kana fogaato Rajada xun ee aad ka leedahay aduunyadan dusheeda, sidoo kalena aad Ficilada xun-xun eed laga yaabo inaad ku dhaqaaqdo adigoonan yeelanin ka fiirsi iyo dib-isugu noqosho, isna weydiissaa Inuu Ficilkan Sax yahay iyo inuu khalad-yahay.

Calaamadaha lagu Garto Ficilka-xun iyo Ficilka-Wanaagsan.

1- Ficilada Wanaagsan.

marka aad hubinaysid Ficilkan ma xun yahay mise wuu fiicanyahay waxaa la eegaa ugu horeyn cidhibta uu ku dambeynayo ficilkan.

shayka Fiican waxaa lagu gartaa Inuu leeyahay soo jiidasho iyo deg-deg,lakiin markaad ka taagantahay dhexda inuu kaa horyimaado aadna iska dayso.

wuxuuna kale uu leeyahay inaad nacdo marka aad go'aansato bilowga ugu horeeyaba.

sababta aad unacayso bilowga hore waxaa weeye Inuu shaydaanku og yahay inuu guul-dareysanayo uuna kaso bixi waayey shaqadii ay udhiibteen kuwa kale,taasina ay noqonayso guul aad ka gaadhay cadawgii ugu darraa ee nafta.

Ficilka Wanaagsan wuxuu kuu sahlayaa,inaad markasta Joogteyso uu kuu noqdo caado.

Noloshu Bani'aadamku waa mid ku xidhan tahay wanaag, islamarkaana laga rabo wanaag inay ku bilaamato, kuna dhamaato.

2- Ficilada Xun.

Ficilka xun wuxuu lid ku yahay Ficilka Wanaagsan,wuxuuna saameyn weyn ku yeeshaa horumarka nafta iyo xidhiidhka Allah iyo addoonkiisa.

Ficilka xun waa ficil ay diinteenna suubani ay kasoo horjeedo ayna aad uga hadashey.

Ficilka xun waxaa lagu gartaa,marka ugu horreysa ee aad kugu soo dhaco, qalbigaaga waxaa galaya cabsi iyo argagax, laakiin isla-markaasba inta aadan si fiican u dareemin waxaa laga sii bixin cabsida, mar danbena dareemi maysid.

waxaa jira Odhaah af-carabi ah oo dhaheysa:-

oo micnaheedu tahay:- (xaqqu wuu culus-yahay wuuna macaan yahay,sharkuna wuu fudud-yahay wuuna khadhaadh yahay).

waxaa laga wadaa oo looga jeedaa"haddii aad rabto inaad qabato wax-qabad kheyrr ah wuu kugu cuslaan, laakiin markaad qabato wuu macaan-yahay, waxaadna dareemi raaxo iyo daganaan".

laakiin"Hadii aad rabto inaad qabato wax-qabad shar ah wuu kuu fududaan,sababtoo ah waxaa garab kaa siinaya shaydaanka.

Marka aad qabato shaygaas, waxaa ku galaya murugo iyo argagax aadna garaneyn meel ay kaaga timid,sababtoo ah xagga danbe yuu ka khadhaadh yahay sharku".

Horumarinta Nolosha.

Nolosha Bani'aadamku waa mid ku dheehan horumar.
Nolosha Bani'aadamka Horumarkeedu waxay is-beddel ku keenaysaa,
Bulshada,Asxaabta,Iyo dadka aad ku dhex nooshahay.

waxaa laga maarmaan ah in hadaad maqashi Horumar, uu jirayo wax la dhaho is-beddel,is-beddel uu yahay mid kasoo baxaya Naftaada.
Hadaba Is-beddelada iyadoo loo eegayo hadba siday tahay ayey khubarada Naftu ay sheegeen inuu jiro labo is-beddel:-

1- Is-beddel Wanaagsan.

2- Is-beddel Xun.

iyadoo ooy sidaa kusoo koobeen khubaradu, hadana waxaa jirta su'aal looga baahanyahay in lala kaashado maskaxda.

-Is-beddelku ma joogtaa mise wuu taaganyahay?

su'aashan jawaabteedu waxaaa weeye, in la is-beddelo mooyee aadan adigu is-beddelaynin,oo ka dhigan in aad adigu raadsanayso Is-beddelka uguna tagayso hadba meesha uu kugu sugayo.

Haddaba ma jiraa Nolol aan is-beddelin?

Nolosha Bani'aadamku Hadii laga waayo Is-beddelada aan kor ku xusnay,waxay ka dhigantahay Noloshani waa mid aan lahayn Hammi Ay ku gaadho is-beddel, waxayna udhowaan inay ka mid noqoto Is-beddelka Xun.

Hadaba aan ugudo galno Is-beddelada aan soo sheegnay.

1- Is-beddelka Wanaagsan.

Qofka Bani'aadamka ah wuxuu leeyahay Naf ugaar ah, sidoo kalena wuxuu leeyahay Nolol isaga ugaar ah, oo ka dhigan in isagu maamulayo Noloshas horseedna uu ka yahay.

Noloshaada oo ku sugan xumaan, kuna dhex-dabaalanaysa Xumaanta Eebe S.W kaa reebay, ayaa lagaaga baahanyahay inaad yeealto go'aan. Allaha S.W wuxuu ku leeyahay qur'aankiisa:-

"إِنَّمَا يَتَذَكَّرُ أُولُو الْبَابِ"

"waxaa waantooba kuwa caqliga u saaxibka ah".

Waxaan uga gol-leeyahay, Is-beddelku aad ku sameynayso Naftaada waa mid adiga kasoo go'aya. Tusaale:-

-Gaadhigu waxyaabaha uu ku shaqeeyo waxaa kamid ah, Mashiinka wada gaadhiga, oo lagamamaarmaan tahay inuu leeyahay gaadhigu mashiin. Hadaba mashiinkaas wuxuu ku socnayaa, uu ubaahanyahay in lagu shubo waa Saliid, Haddii laga baddeli waayo Saliidaas wuu dhimanayaa gaadhigu Heer la iska Naco oo la tuuro".

Tusaalahaas waxaan kawadaa waxa ku wada waa Nafta, Waxay kuu waddana waa Nolol, Haddaba Haddii aad Naftaada hagaajin weydo, oo dib ugu noqon weydo waxay ku xuntahayna ka Hadhi weydo, Waxaad Noqon mid Nacay Nafsaddiisa, Bulshaduna ay Necebyihiin.

Ufiiro, Ruuxu markuu Taxi raacayo ama Rabo inuu gaadhi (Bajaj) fuulo, wuxuu raadsanayaa mid Fiican oo qurux leh, sababtu waa maxay:- Gaadhiga Quruxda Badan lama bar-bar dhigi karo Gaadhiga Xun ee Jajaban, Waxaad Arki dadka oo kuu sheekaysanaya Gaadhigu Hadba Nooca uu yahay, Hadduu Gaadhigaas Qurux iyo Dayactir ka muuqdo, sidaa uu yahay unbaa lagu ammaani, lakiin Haduu lid ku yahay Gaadhigan kale waxaa lagu caayi sidaa uu yahay.

Nolosha Bani'aadamkuna waa sidaas, Hadba Nolosha uu ku jiro waa mid ka muuqanaysa, sidoo kalena waa laga garan marka la arkoba.

2- Is-beddelka Xun.

is-beddelkani wuxuu Lid ku yahay Is-beddelka horey aan kaga soo sheekaynay(Is-beddelka Wanaagsan), Wuuna ka saameyn Badan yahay Is-beddelka kale.

Odhaahdii caanka ahyd "Beentaada Danbe,Runtaada Hore yey dishaa", Tusaalahan innagoo Tix raaceyana,Waxaa dhihi karnaa"Xumaantaada Danbe,Wanaagaaga Hore yey dishaa".

Innagoo sidaa ku fasirayna, Waxaa inoo cad in Xumaantu ay Baabi'inayso Wanaagii hore, Si kastaa ood Wanaag iyo Magacba aad ku lahayd Bulshada,Maamus iyo Kartiba wey ku deysay.

Sheeko gaaban.

anniga oo la fadhiya asxaabtey oo wada sheekaysanayna, yuu mid ka mid ah Asxaabtey yidhi"War gabadhii/Wiilkii Tiktokka caanka ka ahaa,ee dadka waanin jiray/jirtay,maanta wuu/way heesayaa/heesaysaa,illeen waxuu/waxay rabtay, inuu/inay soo caan-baxdo".

Inaad Noloshaada iyo wanaagaagaba aad ku iibsato Xumaan waa laga Fiicanyahay, Sidaa Dooni Hadaad uleedahay Magac, Hadaad ka Doorato Inaad ku iibsato Xumaan, Wuu baaba'yaa wanagaas iyo magacaasba waxaadna noqonaysaa mid meel xun ku danbeeya.

Tusaale waxaa inoogu Filan, IBLIIS(L.C),Isagoo haya furihii Jannada Eebe S.W raali ka yahay yuu ka doortay Naar, maanta adiga yuu ku garab jooga si aad ugu noqoto saxiib, Haddii aad la saaxiibto kuu Eebe S.W lacnadey,Addunyo waxaad ku Noolaan Cadho Eebe iyo Cidhiidhi,Aakhirana Cadaab iyo Ciqaab Alle,Daliil dhameystirana wuxuu inoo caddeynaya Kalaamka Alle S.W (Qur'aanka).

Marka waxaa kuu Fiican inaadan sharaftii, karaamadii, magacaagii iyo waliba maamuskii aadan illoobin, oo aadna ku iibsanin Xumaan iyo cadho Alle.

Waxyaabaha Hormuudka ka ah Horumarinta Noloshaha.

waxaan isku dayeynaa inaan soo qaadanno dhowr qodob, oo garab kaa siinaya,inaad hormariso Naftaada.
waxaan hubaa Haddii aad ku dhaqantid inay kuu fududaaneyso Horumarinta Noloshaaada.
Horumarka Noloshadu waxay Fure utahay, Hormuudka Noloshaaada iyo Midda Bulshadaba.

1- U Dhawaanshaha Eebe.

inaad udhawaato Allihii ku abuuray aadna wanaajiso,Xidhiidhka adiga iyo Eebe waxay kuu sahlaysaa,inay Noloshadu kobacdo.
Haddii ay kobacdo Noloshadu, waxay Noqon mid Bulshada u ah Hormuud,Hadii ay Hormuud unoqoto Bulshadana waxay Noqon Mid gaadhey Horumar.

Eebe ood ku xidhnato waxaa kuu sahlanaanaya,Wax kasta ood uga baahato Noloshaha Haddii ay Noqoto Mid aad Ubaahantahay, iyo Hadii ay Noqoto Mid kuu baahan adiga.

Waxaa jirta inuu qofka ay gasho Rajo uu wax kaga badalyo rajadiisa,lakiin uu iloobo xidhiidhka Eebe.
Hadaad Rabto inaad Horumariso Naftaada, ood ilowdo Xidhiidhkii Eebe, marba wax baad tabi oo kaa hoos bixi,Noloshaduna Noqon mayso Mid dhameystiran.

2- Dhowrista Ammarada Eebe.

Eebe S.W wuxuu na amray Amarro Farabadan, waxaan kamid ah Amarradaas:-

-Oogidda Salaadda.

-Akhriska iyo ku Dhaqanka Qur'aanka.

-Ka fogaanshaha xumaanta.

-Quudinta Masaakiinta.

Iyo waxyaabo badan oon lasoo koobi karin.

Salaadda ood oogtid waxaa kuu furmaya waddooyin badan, Waxaa kuu fududaanaya Rajooyinka aad rabtid inaad gaadho.

Xadhiga isku Hayya addoonka iyo Rabbigiissa waa Salaada.

Tusaale:- Qof ay ka tagtey Salaaddii Casar, waa qof ay ka dhigantahay in loo bilaabey xaashi/waraaq cusub, Dhamaan Camalkii kheyarka ahaa usoo shaqeysanyeyna uu ka masaxmayo.

Rasuulku N.N.K.H wuxuu yidhi "Camalka ugu Horeeya ee addoonka laga xisaabinayo maalinta Qiyaame, Waa Salaada, Haddii ay Salaaddiisu Hagaato, Dhamaan Camalkiisu wuu Hagaagayaa, Laakiin Haddii ay Salaaddiisu Xumaato, Dhamaan Camalkiisu wuu xumaanayaa".

Sidoo kale waxaa lagaa rabaa inaad yeelatid Akhris Qur'aan, sababtoo ah waxaa ku Helaysaa Qodobo Badan oo ku Anfaca, oo aynan Bani'aadam dhihi karin.

Waxaa ku jira Xikmado badan, oo kuu iftiimanaya Meel kasta oo Madow, oo ayna Bani'aadamku Afkooda ka dhihi karin.

wax la bar-bar dhigo maleh, Hadalka Eebe S.W, lamana helayo hadal lamid ah, Haday Noqoto Waano, iyo Haday Noqoto wax kaleba.

Waxaa hubaal ah Hadaad Fahanto Hadalkaas Eebe, Aad fahmi Doontid wax aynan Bani'aadam badani ogeyn, ayna maqlin abid/Waligood.

Eebe S.W wuxuu nooga digay, inaan Xumaanta ku dhigano caado oon ku dhaqano.

Xumaanta ood caadeystaa, waxay dilaysaa Rajada Noloshaada, Waxay Baabi'inaysaa Argtida Dheer ee kuu muuqata, Waxay madoobeynaysaa, Iftiinka aad ku dhex socoto mugdiga, Waxay Indhaha ulaabeysaa riyooyinkii aad soo qabtay, iyo kuwa aadan qabnin labaduba, Waxaa Go'aya xidhiidhkii adiga iyo Eebe S.W, Waxaa ku Noolaansaysaa Nolol, aadan ka lahayn wax Rajjo ah, waxaad ku Noolaansaysaa Mugdi iyo inaad ka murooginin wixii Alle ku faray S.W.

waxaa sidoo kale inoo sahlaysa inaan hormarrino Nafteena, Quudinta Masaakiinta, innagoo ka Farxinayna Quluubtoodana ku beeraya Farxad. Dhibka aad ka caawisay walaalkaaga muslimka ah ee dhiban, waxaa laga yaaba inay adiguna kuu dhib yaraato, Dhib ku heystey oo xaggiyo Nolosha ahyd.

Nolosha Bani'aadamka Horumarkeedu, Waa inuu xidhiidhka Eebe S.W wanaajiyo.

Si kasta ood ugu jirto Nolol Fiican, Haddii aadan la laheyn Xidhiidh Eebe S.W, Noloshaasi haba-yaraate yeelan mayso wax raaxo ah, waxay Noqon Nolol aan laheyn meeshii ugu muhiimsaneyd ee la rabay.

Shimbirtu Hadday Baad la'dahay, ma duuli karto.

Nolosha Bani'aadamkana, Haddii ayna Allah S.W Xidhiidh la laheyn, ma sii socon karto, mana gaadhi karto meeshii lala rabay.

3- Ka Dheeraanta Kuwa Niyad-Jabka Badan.

waa muhiim inaad leedahay mooraal kugu dhiirinaya, inaad Noloshada hormariso,adigoo La kaashanaya Qof aad ku isku-haleyn karto.

waa inaad ka Fogaato kuwa ku Niyad jebinaya, ee Raba inaad an iyaga dhaafin ood Noloshaa xun la wadaagto.

Markasta waxaa lagama maarmaan ah inaad leedahay, Samir iyo Dulqaad aad ku xammili karto Dhibka badan eed wajahysid,Hadii aad tahay mid Leh Samir iyo Dulqaad,wax ku dhaawac gelinayo ma jirayo,ama ku reebaya riyadaada.

Haddii aad adigu tahay qof riyadiisa raadinaya,waa inaad usoo bandhigtaa cidda aad isleedahay way ka gudubtay caqabadan, oo wey guuleystey,halkaas ood ka helayso Moral aad ku gaadho riyadaada. Lakiin haduu kuu yimaado,Qof raba inuu ka dhabeeyo riyadiisa,waxaa lagama maarmaan ah, inaad caawiso ood dhiiri geliso,iska ilaali inaad dhaawacdo riyoyinkiisa,illeen bulshadaa dhan kaligaa yuu kaasoo doortaye.

waxaa lagaaga baahanyahay inaad an ka hadhin,ood talaabk walba la qaaddo,Si uu isaguna talaabada ula helo kuwa ka danbeeya. Noqo qof dhiiri-geliye ah, Si ay jiilka kaa danbeeya iyaguna udhiirigaliyaan dadka ka danbeeya,sidoo kalena waxaad ku dhexyeelan bulshada dhexdeeda Mamuus iyo magac.

4- La Gaar Noqoshada Naftaada.

waa muhiim inaad leedahay is xisaabin,inaad leedahay dabagal iyo inaad leedahay xaqiijin.

waxaad tahay qof ku dhex jira bulsho hallowaan,waxaadna tahay kii baddeli lahaa bulshadaa.

Bulsho sida loo Halleeyo way fududahay,Lakiin sida loo hagaajiyo way adag tahay.

Inaad yeelato isla xisaabtan, waxay kuu sahleysaa inaad mar dhow bulshadaada la xisaabtandid,waxay kuu sahleysaa inay bulshadaa noqoto Bulsho dhisan.

Ma fududa inaad Bulsho dhistid,lakiin waxaa fudud inaad naftaada dhistid.

Nolol dhisan unbaana bulsho dhisi karta.

Inaad bulsho dhisto waxay Ubaahantahay inaad marto waddooyin dhaadheer,Waxaad Ubaahantahay inaad isweydiiso maalin walba waxa aad qabatay,iyo waxa aad bulshada uqabatey.

waxaad Ubaahantahay qorshe meel mar ah, qorshahaasna uu noqda mid kuu gaar ah ood bulshada wax ugu qabanayso.

Maalin Walba oo cusub waa inaad cusbooneysiisaa qorshahaaga, qorshahaagu waa inuu yahay mid hirgalaya adigoo xaasabtan ku sameynaya Naftaada.

Inaad la gaar noqoto Naftaada maha haybad mana aha hibo,waa karti. dadku way kula darajo sarreeya, labo ruux oo kala darajo ahna isma bar-ber dhigeysid,ileen waxaad taqaanaa kartiidsa.

Kartidu way kala duwan tahay, lakiin kartidu waa hadba darajada aad taagantahay.

Maalin walba oo cusub dib isugu noqo, Si aad u ogaato kartidaada, iyo heerka ay taagantahay darjadaadu.

Naftaada Usamee qorshayaal kala duwan, hiigsigooduna yahay hal darajo.

5- Diwaan gelinta yoolasha waaweyn ee aad leedahay.

ugu horeyn intaa aadan ugalin yoolashada waaweyn eed leedahay, waa inaad ogotaa waxa aad ku fiicantahay.

Noloshu waa karti,wax walba waad ku fiicnan kartaa, lakiin waxay Ubaahantahay dadaal.

Dadka waxbaad dheertahay,waxbaadna kaga fiicantahay,si ayna yoolashaadu kuugu hirgalaan waxaa lagaaga baahanyahay inaad soo bandhigto Waxaad ku fiicantahay.

Yoolashaada ood meel Mariso waxaa kuu suurto galaya,Horumarinta Nolosha.

Horumarinta Naftaada looma maro wado Fudud,Laakiin Kolba habka aad isticmaashid yaa fududeynaya Nolosha.

Dad waxaa jira Naftaada ka War haya,lakiin adigu ma isweydiisay sababta uu uga warhayo?

Runtii Ruux kasta waa la gartaa waana la fahmaa dabeecaddiisa, Dadkuna waa kuwo ka warhaya,lakiin waxaa khalad ah inaad dadka usoo bandhigtid dabeecad aadan lahayn.

Waad hirgalisay qorshahaagii,waadna ogaatey waxaad ku fiicnayd, lakiin ma garanysaa sidaad kusoo bandhigi laheyd?

Waxaad la kulmi caqabado badan, Waxaa kaa hor Iman dad badan ood isku dhaweydeen, qaarna ay ku taagerayaan.

waxaa lagama maarmaan ah inaad leedahay kalsooni, si aad uga hadhin yoolkaaga.Dad baa si cad kaaga soo horjeedsan,Dadna Si Dadban Bay kaaga soo horjeedsan, Dhibaataada ugu weynna waa Dadka sida Dad badan kaaga soo horjeedsan.

labada dhinacba waxay diidanyihiin hormurka Nolosha iyo yoolka aad filanayso,Laakiin Kalsooni iyo feejignaan ood yeelataa, waa Hubka ugu muhiimsan eed u iscmaaalo karto dhibaatooyinka kaa hor imanaya.

-Waxyaabaha saameynaya noloshaada.

intaa aad ku jirto ka meel gaadhidda Nolosha,waxaad la kulmi caqabado badan, kuwaaso kaa hor istaagayaa hiigsigaagii. waxaa jira Odhaah dhahaysa, "Markasta ooy badatu kartidaadu,waxaa badanaya Nacabkaaga".

Odhaahdan waxay ku fadhida micno balaadhan. Odhaahdan waxaan kaa faa'ideynaa waxyaabo badan,Qofka Bani'aadamka ah kolba darajo yuu gaadhaa,darajo walba ood gaadhana, caqabad hor leh yaa kusoo wajihi, caqabaddaa aad ugudubteyna waxay wadtaa dadka kaasoo horjeedasanaya, Rabana inay ka takhalusaan yoolkaagan aad wadatid.

waxay dhahaan khubarada cilmiga Naftu, in Nafta haduu ka hor yimaado wax caqabad ah, ay caqabaddaasi Sababi karto inuu ruuxu iskaga hadho riyadiisa,waana saameyn weyn oo ay kuu leedahay dhaawicida Nolosha.

ogaanshaha xaqiiqda Nolosha waxaa kaa hor imanaya saameyno waaweyn, oo Dib-udhac ku keenaya ogaanshaha Xaqiiqda Nolosha. Saameynba saameynta kale yey ka weyntahay,waxaan soo qaadanynaa inaan kuwa ugu waaweyn soo qaadanno.

Runtii saameysahaas keliya kuma koobna Horumarinta Nolosha, marar badan ood leedahay Rajooyin kale yey kaa hor imanayaan. saameysahaas haday ku talaalaan, ogow adiguna ruux walaalkaa ah yaad ku noqon saameysahaas.

1) Ibliis(Shaydaanka)

shaydaanku waa cadowga ugu horeeya ee nolosha,waana saaxibka Nolosha.

wuxuu la leeyahay Xidhiidh dhow Naftaada, wuxuuna ka taliyaa mar walba siduu kuu baadiyeyn lahaa.

Iakiin siduu Eebe S.W qur'aankiisa ku leeyahay

"إِنَّ كَيْدَ الشَّيْطَانِ كَانَ ضَعِيفًا"

"dhagarta shaydaanku waa mid daciif ah".

Waxaa aayadaa laga wadaa in Haddii la iska celiyo oo lala dagaalamo uu kaa hadhayo.

Eebe S.W wuxuu sidoo kale qur'aankiisa inoogu sheegaya, inuu shaydaanku yahay cadawgeena, inaguna aan ka dhigano cadawgiisa.

isaga(Ibliis) yaa kuugu filan Tusaale,Nicmaduu Eebe ku Mannaystey iyo siduu uga kufriyey.

Markasta ood wadato olale, isaguna wuxuu wataa ololihiisa.

Shaydaanku wuxuu kamid yahay saameeyaasha, waana kooda ugu horreeya,Hadafkiisuna uu yahay inuu kaa joojiyo hawl-galka aad waddo ee ku saabsan Horumarinta Naftaada.

Naftaada yuu buun-buuninayaa si ay uga caajisto hawl-galkan, una noqoto mid aan niyad iyo hammi uhaynin.

Shaydaanku waa cadowga ugu horeeya ugana daran, kuwa aan rabo inaan halkan ku sheego.

Wuxuu xidhayaa dhamaan waddooyinkii kuu furnaa isagoo isticmaalaya Naftaada, Kaagana dhigaya inaad kaligaa tahay oo aadan sii wadi karin inaad horumar ka gaadho Naftaada.

2) Hawadaada.

cadowga labaad ee kasoo horjeedsanaya inaad Fahamto Noloshaaada, waa Hawadaada ood raacdid, maalin walba aad qabatid waxaad jeceshahay, booskana aad ka saartid qorshahaagii muhiimka ahaa eed wadday.

Hawadaadu waaa cadow siduu Eebe S.W inoo sheegay. Waxaad Rabtaa inaad horumariso Naftaada, Waxaad Rabtaa inaad Dad badan oo nolosha ka dhacey aad dhaaftid, Hadaba maka adagtahay Hawadaada?

Noloshaada saameyn Bay ku yeelan, hadaada ka adkaan weydo ood wax kasta ood sameynayso ay kaa hor imaanayso.

Waa hubaal Hawadaadu wey ku hor imaan, lakiin waxaa la rabaa qofku inuu yahay mid Fikiraya siduuna isku dhiibin, sidoo kalena leh samir iyo dulqaad, sidoo kalena aadna u ogalaanin cadawgaagu inuu kaa guulaysto.

Hawadaada goortaaad gaadho guusha waa mid ku taageeraysa, waana mid marka keliya guusha gaadho ku taageeraysa, Dhamaan xilliyada kale eed rabto inaad wax-qabad wax tar leh qabato kasoo horjeedsanaysa waana sabatay unoqotay cadawgaag.

Hadaad rabto inaad ka adkaato hawadaada, waa inaad markasta ujeeda dhanka kheyrka, kuna qasabtaa Cibaadada Eebe S.W iyo wixii kale uu ku faray, Halkey iyaduna isku dayeyso inay kaa jeediso daacada Alle S.W kuuna jeediso Dhanka shaydaanka.

3) Saaxiibka Xun.

Runtii Saaxiib aad wakhti dhan saaxiibo ahaydeen ood moodeysay inuu saaxiib dhab ah yahay, kadibna kaa soo horjeedsay xilligii aad uga baahneyd caawimaad kuna Moral jabiyeey, Runtii kaas Saaxiibka mahan ee Runtii wuxuu ahaa Sun kugu dhex jirta Saameynteedana aad maanta aragtay.

Nolosha waxyaabaha ugu qurxoon waxaa kamid ah, inaad Haysato Saaxiib Xilli kasta garabkaaga taagan. Dadku wey soo Galaan Qalbiyadeena weyna ka baxaan, lakiin waxaa Raad ku leh qalbiga saaxiibada dhabta ah.

Saaxiibkaaaga dhabta ah waxaad ogaan markaad ubaahato xilliga Dhibta ku haysto, Saaxiibka Dhabta ah waa dhiirigeliyaha Naftaada si aad ugaadho horumar, waana mid kula raba guul inaad gaadho aana kula Rabin Guul Darro, Waa mid taagan garabkaaga Markasta Xilli murugo iyo Xilli Farxadba, Waa mid kula qaybsanya Dhibka ku hysta Murugada iyo Farxadaba, Mana kala maarmeysaan wakhti walba.

Saaxiibka dhabta waa mid aan lasoo koobi karin wanaagiisa, Keliya waxaa garan Ninkaan haysanin Saaxiib dhab ah.

Hadaba adigu ma tahay saxiib wanaagsan, mise waxaa tahay saaxiib dhagar badan oon la isku haleyn karin?

Riyooyinka Nolosha.

- Waa Maxay Riyo?

Riyadu waa Hiigsiga Hammigaaga iyo inaad ka Rumeeyso Hadaafkaaga. Ninkaan Hamigiisa ku haysan qalbiga, Hadafkiisa ma haybsan karo.

Nolosha way Riyooyin badan tahay, mar walba waxay kuu furaysaa waddo, waddadaas dhameystirkeeda adigaa lagaaga baahanyahay, Ma fududa inaad ka gun-gaadho Tiigsiiga Riyadaada.

waxaa jira caqabado kaa hor imanaya, intaad gaadh isleedahay, Laakiin markaad ogaato halkaad taagantahay iyo waxa kaaga hadhay riyadaadii, yaad aqoonsani caqabada ku hor taagan.

Shicirkii "qofkii sareyn dalbada(doonaya), wuxuu soo jeedaa habeen". Guul laguma gaadho si Fudud, Lakiin markaad gaadho unbaad ka sheekayn, ma fududeyd mise way adkayd.

Riyadaadu waa midho dhalka rajadaadii, waa gunaanadka Dadaalkaagii waxasoo dhan waxaad usoo daadalaysan maadaama ay ahayd inaad gaadho riyadaada.

Riyadu waa iftiinka Hadaafkaaga, Markaad gaadho darajadaa waxaa kuu ifi(iftiimi) waxyaabo badan, lakiin hadaad ka jeedsato waxaa mar-mar udami dadalkaagii iyo rajadaadii.

Ma isweydiisay Sababta ay gaadhida Riyadu uculustahay?

-Nolosha Bani'aadamku way Riyo badan tahay, markaad Riyo dhowrataba Tu kale Bay kuu sawiri iyadoo ku leh Tan way Culus Tahaye tan kale dhowro, Dabadeedna laga yaabo inaad halkaa ku ilowdo.

Noloshu Bani'aadamku waa Muran badan tahay, Murran kaasna adiga unbay kula galaysaa, Waxay kuu sawiraysaa inaad Hadda ku jirto Nolol Fiican ood isaga hadhid Rajadan, Qofka caqliga usaaxiibka wuu Fahmi ujeedada Naftiisa iyo Khatarta ka tagidda Riyadiisa waana sababta uu Naftiisa u aaminin badanaa.

Sheeko ku saabsan Riyada Nolosha.

waxaa jiray laba wiil oo saaxiib ah, labadaa wiil waxay ka dhasheen laba Reer oo Danyar ah, Labada maalin walba waxay ubixi jireen suuqa si ay reerahooda ugusoo helaan Nolol-maalmoodkaada,Iyagoo Dadka Dawarsanaya,Inkastoooy caqabado badan la kulmi jireen hadana wax unbay reerka ukeeni jireen.

Labada Wiil mid ahaa curyaan midna wuu Caafimaad qabay,Wiilkan Curyaanka ah Dhib Farabadan yuu mari jiray si uu Reerkooda waxay ku Noolaadaan ugusoo Helo,Laakiin Badanaa Ka Caafimaadka qaba yaa Waxa soo galaya ka badnaan jiray maadaama uu caafimaad qabo,Dadkana Si dhakhso ah ugu tagayo.

Maalin Maalmaha kamid ah Waxaa Magaalada Soo maray Wafti Ajanabi ah, kasoo la sheegay inay caawinayaan Dadka Dhibaateysan. Markay maqleen labadii Wiil sidaas waxay si dhakhso ah utageen meeshii dadka lagu caawinayey,Inkastoo wiilkan Curyaanka ah uuna si deg-deg ah utagi karin, Laakiin wuu Daadaaley ugu Dambeyna Wuu gaadhey.

Waftigii Ajnabiga ahaa wuu khudbadeeyey Intuuna Bilaabin Caawinada ka hor,Iyagoo ku Khudbadeeyey Khudbad aan horay looga baranin,Waxay sheegeen inay Wakhtigan Soo gudbiyeen Fursado Qaali ah Sida looga Faa'ideysanna ay adagtahay.

waxay sheegeen inay dadka danyarta ah caruurtooda wax barayaan si ay usoo baxaan, Reerkooduna uga maarmo Dhibkan Haysta. Waxay Qoreen Dhamaan Caruurtii Reerihii Danyarka ahaa, Markii lasoo gaadhey wiilkii Curyaanka ahaa, Waxaa Dhacdey inay Iska Dhafaan oo ayna Qorin,Wiilkii oo ku keentay Middaas Murugo iyo Rajo Dhac,Saaxiibkiina uu ku Jiro Dadka la qoray.

Wiilkii wuu sameeyay wax walba si loo qoro Laakiin iyagoo Takooraya yey caydhinayeeen.

Wiilkii Qof walba wuu utagay Laakiin Wax la Hadla wuu wayey,Diwaan gelintan waxay socotay 7 (Todobaad),Wiilkiina Maalin walba wuu tagayaa si mar uun u helo Fursad,Laakiin Maalin walba oo tago wuxuu lasoo kulmaa caqabad.

Wiilku mahayn Wiil samraya, wuxuu ahaa wiil karti iyo Daganaansho ay ku dheehantahay.

Waxaa Gaadhey Maalintii ugu danbeysey, Dadkii aan la qorin baa saf soo galay,Wiilkiina isagana kama Hadhin Illeen Rajjaa ku jirtee isagoo leh mar unbaa lagu Qori,Nasiib Xumo Wiilkii Maalintii ugu danbeysay Sidii ayaa lagu Qori waayey, Laakiin Wiilku wuxuu ahaa Wiil Go'aan adag.

Wiilkii Wuxuu go'aansadey inuunan ka Tagaynin Illaa oo la Qoro, wardiyaashii ayaa bixiyey Wiilkii Iyagoo ugu Hanjabey inay Dilayaan Haddu Xaafaddiisi Tagi waayo,Laakiin Wiilkii wuu diiday wuuna iska indhatiray caga-jugleyntoodii, Wiilku waa wiil Rajo Leh, Waa wiil Raba Inuu kaga Dhabeeyo Rajadiisa Rabana in Mar uun la Qoro.

Habeenkii ayaa gaadhey, Wiilkiina wali wuu joogaa Dhulkiina waa mugdi oo waxba ma uu arkayo, Waxaa Caado U ah dadkan ajnabiga ah inay wateen Ey, kuwaasoo Habeenkii lasoo Daayo Maadama aan Waxba loo arkaynin Si Fiican .

Wiilkii Eydii ayaa Argatay,Carar yuu is yidhi lakiin Nasiib Xumo way qabteen Maadaama uunan ordi karin.

Eydii Dhaawac ayey ugeysteen Wiilkii Heer ugadho Inuu dhaqaaqi waayo.

Waagii ayaaa baryey,Wiilkiina waa Dhaawac Isagoo Dariiqa Dhex yaala, Dadkii ayaa arkay waxayna iyagoo gadoodsan tageen Teendhadii ay Daganaayeen ajnabigu iyagoo ku leh " Ma Sidan yaad wax noogu qabanysaan,Shacabkii yaadba leyneysaane".

Ajnabigii way argagexeen waxaana loogu hanjabay inay ka baxaan magaalada dibna ayna usoo noqonin, Laakiin waxay si Deg-deg ah ubixiyeen Raali galin iyagoo sheegaya inay Wiilka iyagu Daweynayaan Eediisana ay qaadayaan.

Waxay Sheekadii Gaadhey Madaxii Maamulayey Waftiga, Dabadeedna isagoo Ordaya yuu yimid wajigiisana ka muuqdo Cadho, Wuxuu yidhi itusa wiilkii Dabadeedna waa la tusay, Wuxuuna amar ku bixiyey in Wiilka si Dhakhso ah loo Daweeyo looguna keeno Xafiiskiisa markuu Caafimaado.

Madaxii wuxuu gudo galay inuu canaanto Dhamaantood isagoo ku eedeynaya wax qabasho la'aanta iyo Takooridda ay dadka Takoorayaan,isagoona Leh "**dadka ma inaan dhibno yaan unimid oon takoorno, mise inaan wax uqabano oon taageerno?**"

Wiilkii Wuu Caafimaadey waxaana loo keenay gaadhi curyaan, waxaana loo geeyey Madixii,Dabadeed Madaxii wuxuu usoo Dhaweeyey Si Diirran isagoo ka raali geliyey Dhibkii loo geystey iyo ku Takri felkiiba, Wiilkiina wuu ka aqbalay Raali Gelintii isagoona uga digey inaan mar kale Bulshada Loola iman Ficiladan Xun-xun ee lakula kacay isaga.

Madixii wuxuu wareysi ka qaadey wiilkii, Wuxuuna usheegay wiilkii Dhibka iyo Rafaadka ay ku sugan yihiin Reerkiisu, iyo Taakeero La'aanta ka jirta Bulshada, Wuxuuna uga sheekeyey Dhamaan Dhibkii iyo Rafaadkii ay soo mareen isaga iyo saaxiibkii.

Madixii wuxuu weydiiyey wiilkii sababta uu uga hadhay saaxiibkii, wuxuuna uga jawaabey inuu ka hadhay markuu gaadhey dantiisii. Madixii wuxuu usheegay wiilkii inuu yahay kaasi saaxiib xun, isagana Fogaado intuunan ku saameynin.

wiilkii wuu ka aqbalay Taladiiisii waxaana lagu daray ardaydii la qoray isagoo Madixiina siiye wiilka lacag ku Filan isaga iyo Reerkoodaba, kagana baxaan saboolnimada, Wiilkiina wuu ka aqbalay hadiyadaas isagoona ujeedsaday Dhankiyo Reerkoodii isagoona ka midho dhaliyey Riyadiisii.

Ujeedada Sheekada.

Sheekadan aan Tusaalaha kusoo qaatey,waxaa inooga baxaya waxyaabo badan.

Ugu horreyn Kalsoonida Naftaada, iyo inaad ka Meel Gaadho Hadaafkaagaa.

Runtii waxaa ku sugan waxyaabo badan, oo lagaaga baahanyahay inaad ku dayato.

Sheekadan Tusaalaha ah waxay kuu fuuraysaa Albaabo badan ood ubaahneyd in lagaa siiyo warbixin.

Sheekadan waxaa inoogu cad waxyaabo badan oon kaga soo hadlay Bogaggii hore, una baahan inaad dib ugu noqotid maskaxdaada saameynta iyo Faa'iidada labaduba.

Runtii Akhriste, Mahan Nafsadaadu mid kula jecel wanaaga, waa mid moodeysa inaad ku jirto Nolol tii ugu fiicneyd, Waxay kula jeceshahay inaad markasta ood wax qabanaysid aad qabato Wax Fudud Haddii la qabanayo wax adagna, waa mid ka carareysa kaana horkeenaysa waxaa aad qabaneyso.

waxaa jira odhaah dhaheysa,"**Hadaad qabato wax Fudud Noloshaadu waxay Noqon mid culus,Hadii aad qabato wax Adagna Noloshaadu waxay Noqon Mid Fudud**".

Runtii odhaahdan waxay ka Turjumaysa Rajada Nolosha iyo Hadba Hiigsiga galaya, Waa Odhaah Run ah sababtoo ah hadaad Naftaada Barto wax Fudud Waligeed waxay dooni inaad Qabato Wax Fudud markasta, Nolosha Bani'aadamkuna maha mid markasta ku jirta Nolol Fudud hadba waxay wajahysaa Caqabad.

Nolosha Bani'aadamku maha mid uu ka dhamaado dhibku, waayo addunyadan yaa imtixaan ah siduu Eebe S.W noo sheegay.

Noloshaada hadaad barto Waxyaabaha Culus iyo ka hortagooda, waligeed wax ka hor imanaya malaha.

Nafta in la baro xaaladaha Cul-culus waxey Hadhow kuu keenaysaa inay Fududeysato Wax walba, Noqotana mid leh Karti iyo La qabsi.

gun-gaadha Riyada.

ka gun gaadha Riyoona Bani'aadamku waa mid ubaahan karti iyo La qabsi lagama maarmaan tahayna in labadaa la'aantood lagaa waayo. Riyada Bani'aadamku waa sidii ceel biyo ah oo la qodayo oo kale, Siduu ceelasha qoditaankoodu ukala Fuduyihiin yey ukala Fuduyihiin Riyooyinka Bani'aadamku.

Tusaale.

Haduu goobta ceelka laga qodayo tahay Goob Ciid Fudud durbana laga Biyo gaadhi karo waa mid ufududaanysa Qodayaasha.

Sidaas oo kalena Nolosha Bani'aadamka Riyadeedu haday Fududahay keliya Dadaal baa kaa xiga, lakiin haday adagtahay ood meel adagtahay in lagaadhona aad tiigsanayso, keliya waxay kaaga baahantahay Karti iyo Dulqaad.

Riyada Bani'aadamku waa mid wadata caqabadeeda, waa mid wadata Faa'iidadeeda, Waa mid lagu kala duwan yahay ka gun-gaadheeda. Ninba siduu udadaalo yey uga dhakso badan tahay ka horgaadheeda. Maha Runtii mid la fududeysan kar, Laakiin waa lakala Dulqaad badan yahay.

Kaluunka badda ku jira waxaa jecel Noole kasta si uu ugaadhsado, Laakiin waa mid marnaba la maqlin Kaluunkii wuu la waayey(guurey) sababtoo ah waa mid baddaas Eebe S.W karidiisa iyo dulqaadkiisa ku joojiyey.

Riyada Nolosha Bani'aadamku waa sidaas oo kale, waxaa jecel inaad ka hadho Makhluuq badan, lakiin middaas waxaa ka daran iska hadhideeda ama isdhiibida.

Riyada Bani'aadamku waa sida Biyaha oo kale markasta way socdaan, ugu danbeyna waxay ku danbeeyaan inay ku darsamaan biyo badan. Sidaasoo kale Riyada Bani'aadamku waxay ka bilaamataa Fikiro Illaa ugu danbeyn ay isku badasho Ficil iyo gaadhitaan.

Riyadaadu waa Horumarka Noloshada, Waa Iftiin Cusub oo kuu bilaabmaya, lakiin ma isweydiisay Sababta aad uga gun-gaadheysid Riyaada?

Su'aashaas waa mid jawaabteedu Tahay Dhankaaga, Lakiin ma isweydiisay maxay ku sugantahay Noloshadu?

Hadba Noloshad ku jirto yaa ku Turjamaya Riyadaada.

Markaan leeyahay Nolol kama hadlayo Noloshada aad iyo Reerkiinu ku nooshihiin, lakiin waa Noloshada ay ku jirto Naftaadu.

inaad Riyadaada kuu hirgasho waxaa kamid ah, Hadba Tiigsigaagu intuu le'eg yahay, Hadba Tiigsiyada Dhaadeer ee Fiican waxay u sahlayaan Noloshada Inay uxawaareyso Dhanka iyo Ka dhabeynta Riyada.

Naftaada waa inaad ka dhaadhicisaa ka dhabeynta Riyadaada iyo yoolashada Hadaafkaaga.

Yoolashada waaweyn eed leedahay eed rabto inaad ku gaadho riyadaada, waa waxyaabaha Kaa Caawinaya Der-der Gelinta Noloshada.

Inay Leedahay Naftaadu Qorshe ay ku socoto oo ayna ka hor imanin yaa kaa saacidaya Gaadhidda Riyadaada.

Maalin Maalinta ka Danbeysa Noloshada Bani'aadamku waxay usii dhawaanaysaa Waa geerida, Sidaas ooy tahayna ama waxaad udhaawaanaysaa Dariiqa Guusha ama Khasaaraha.

Runtii ujeedkaygu waxaa weeye Inuu yahay yoolkagu mid wax kuu tarri kara Maalinta Xisaabta(Qiyaamaha).

Inaad Yoolashada iyo Riyooyinkaaguba Ay yihiin mid ku salaysan Aduun iyo aakhiraba, waa waxyaabaha kuu horseedaya guusha adduunyo iyo aakhiraba.

Hadba siduu yahay Hadaafkaagu yey Noqon Noloshadu, Waana mid hubaal ah oo la Tijaabiyey.

Hadba siday ahaato Noloshaadu unbay ahaan waligeed, Waxaan uga jeedaa hadduu Qofku yahay Mid kusoo koray mukhaadaraad iyo daroogooyin, Waa mid Naftiisa Dhaawaceysa aanna Illoobeynin waligii xittaa haduu ka iska daayo.

waxaad caadeysato unbaa udanbeynaya Naftaada.

Nafta Bani'aadamku waa mid, mana laha Naf labaad, sidaas ooy tahay Nafsadaha Bani'aadamku way kala xun yihiin siday ukala Dabeecad Duwan yihiin.

inay Naftaadu kugu hogaamiso Dhanka Sherka ood uhoogimin weydo Dhanka Kheyrka, Runtii waa mid ku jirta Nolol Xun, sidaas ooy tahayna waa la baddeli karaa Nafta Bani'aadamka iyadoo Dhaqamadii xumaa laga jarayo loona jeedinayo Dhaqamada Wanaagsan uu kheyrku ku jiro.

Nolashaada sheyga kowaad ee wax ka baddaleya waa Naftaada waana Hadba sidey Tahay.

Noloshaada inaad gaadho Riyadeeda waxaa sabab unoqonaya Naftaada waana sidey tahay kolba.

Naftaada waxay Ubaahantahay inay yeelato Qorshe Haga oo gaadhsiiya Riyada, iyadoo laga ilaalinayo Inuu galo Rajo middaas ka baxsan.

Noloshaadu way Rajo badan tahay, lakiin Rajadeeda ugu Fiican waa ujeedinta Dhanka Wanaagu ku sugan yahay.

Naftaadu waa Taageraha Joogtada ah ama Mucaardka Joogtada ah eed leedahay, labadaa waxay Noqon Hadba siduu yahay Go'aankaagu. Naftaada waxyaabaha keenaya inay ka hortimaado Go'aankaaga waxaa kamid ah, inaad laheyn Go'aan adag oo joogto ah, waa waxyaabaha kaa hor keeenaya Caqabadaha Nolosha ee kugu iman karta.

waxaa lagaaga baahanyahay inaad leedahay dadaal joogto ah ood ku xawaareynayso Noloshaada, waana lagama maarmaan inaad laheyn Dadaal.

Dadaal la'aan oo dhigto noloshaada waa mid saameymaysa Riyadaa. "Geedba Geedkuu ka biyo badan yahay yuu ka midho Fiicanyahay", hadba siduu Noqdo dadaalka Riyadaadu waa mid kordhinaysa Xawaarahaaga.

Riyadaadu Waa hirgeliyaha Qorshaha aad ka leedahay Dunidan. Riyadaadu waa yoolka kuu hirgelinaya inaad guul ka gaadho Nolosha adduunyo iyo Ta aakhiraba.

Riyadaadu waa Gaashaanka keliya eed haysatid si aad uga baxdid Nolosha Saameynta kugu leh ee sababaysa inay kaa reebto facaaga kaagana tagto meel xun iyo mugdi.

Ka Dhabeynta Riyada.

Runtii Inaad ka dhabeyso riyadaada waa mid ku anfaceysa, waxaa jira dad badan oo markay kasoo dhabeyeen Hadafkooda keliya ay udhimantahayna Riyadooda ay ka laabanayaan, Taasoo ku keenaysa Noloshaada Hor udhac.

Adoo maraya albaabkii ugu dambeeyey inaad iska furto oo keliyana dhimantahay, yuu go'aankaagu Is-beddeli karaa. Hal khalad oo kaa dhaca waxaa laga yaabaa inuu baddelo dhamaan Noloshaada Dibna ugu celiyo Mugudiigi.

Yeynan Naftaadu iyo Shaydaanku kuu beensheegin, Runtii ka dhabeynta Riyadaada oo keliya yaa ku beddelaysa haddu Alle S.W kuu qoray. Lakiin inaad aaminto Quraafaadka maskaxdaada kusoo dhacaya, Waa mid kaa reebaysa Riyadaada.

Sheyga keliya ee kaa caawin kara Eebe ka sokow waa Hadba siduu yahay Qorshahaagu. waxaa tahay Qof Bani'aadam ah oo wax illoowi kara khaldami karana, lakiin waa inaad ka qaadataa Go'aan adag oo kuu sahalaya inaad iska Diciifiso cadawgaag.

Bani'aadamku waa kuwo Tartamaya, sidaas ooy tahayna waa la isdhaafey, Nafba Nafbey ka Sharaf iyo Qiimo badan tahay, Waxaana lagaa doonayaa inaad ka Mid noqoto Dadkaa Tartamayaasha ah. "Kooxaha Kubadda ciyaaraya Koox unbay Raacdaa Guushu, Sidaas ooy tahayna Bani'aadamka Tartamayana Mid baa guuleysan mid wuu guul dareysan. Eebe S.W wuxuu ku leeyahay qur'aankiisa

<<فَلْيَتَنَافِسِ الْمُتَنَافِسُونَ>>

ooy micnaheedu tahay "Ha tartamaan Tartamayaashu".

Tartanka waad Guul darreysan kartaa, Lakiin marnaba ha isdhiibin. Khalad kasta ood gashana hakuu noqdo Cashir aad khaladka Dambe ku sixi karto.

Khalad kasta ood gashid wuxuu kuu furayaa jid cusub, waa hadii aad tahay mid aan si dhib yar isku dhiibin.

Naftaadu ha barato Howlahaaga, si aynan uga suurtoobin inay isku dhiibto Si Fudud.

Adoo isku dhiiba si Fudud iyo adigoo isku dhiiba si adag, Way kala Duwan yihiin.

Naftaada marnaba ha barin wax la dhaho Isdhiib, Waxay kuu sahleysaa inay Naftaadu yeelato Qorshe meel ku socod leh.

Marnaba haku fikirin waad soo daadaashey maskaxdaadana ha galinin, sababtoo ah waxay usahleysaa Naftaada inay ka hadho Qorshahaaga. Markasta Naftaada usheeg inay udhiman tahay Howshii ugu cusleyd si ay ula qabsato qorshahaaga.

adigooy inyar kaaga dhigamantahay jidkii aad haysay, Marnaba Naftaada ha usheegin inaad soo gadheen Riyadiinii, Waxaa macquul ah inay halkaa ka noqoto.

Naftaadu waa cadow, marnaba ha isku deyin inaad Naftaada ufudeydiso Yoolka kuu dhiman.

Naftaadu waxay jeceshahay waxaa kamid ah, inaad Tahay Qof Daciif ah, inay kaa muuqato Karti la'aan, inay kaa muuqato Qorshe la'aan, waxaas oo dhan waa waxa saameynaya Noloshaada.

Mar walba hakaa muuqato Karti iyo wax garad hana kaa muuqato Qorshe iyo tiigsi sidoo kalena Ad-adeyg iyo Iyo dulqaad.

Ha u ogalaanin cadawgaagu inuu kaa guulaysto, Hana u ogalaanin cadawgaagu inuu kusoo dhawaado, Hana u ogalaanin cadawgaagu inuu soo dhex galo Qorshahaaga.

saameynta uu leeyahay cadawgu waa naqaanaa, Sidoo kale waxaa Naqaana Suntiisa markuu kugu Duro, sidoo kalena waxaa naqaanna dhawaanshaha uu kuu dhow yahay.

Marnaba Naftaada ha ugalinin gacanta Qof aadan aqoon ulaheyn, si ayna kuugu gacan gelinin cadowgaaga.

Ha isku dayin inaad soo dhaweysto cadowgaaga si uunan kaaga fogeynin Hadafkaaga.

Marnaba Ha iska dhaadhicinin Inaad Guuleystey, Si ayna Naftaadu uguul dareysanin.

Isku day inaad ka dhabeyso riyadaada adigoo raacaya jid saxsan.

Dhamaan noloshaan addunyada waxaa kuugu sugan Xirfado, Sidoo kale waxaa kuugu sugan cashiro aad Ubaahantahay inaad barato.

Qorshahaaga aad kusooctid ha noqdo sidii shimbirta oo kale, Shimbirtu haduu baal ka maqan yahay ma duuli karto, Sidaasoo kale waa inaad yeelataa Baalal aan si dhib yar ku go'aynin, cadawgaagana ha u ogolaanin inay kula duulaan sababtoo ah way kaasoo ridayaan Meesha sare aad mareyso.

Tusaale Ku saabsan kartida waxaan kaga dayan karnaa qudhaanjada, Waxay qaadeysaa shey ka tan badan ama ka awood badan, hadana maha mid samraysa ugu dambeyna waxay geynaysaa godkeeda.

Adigoo Wada howl kula tan ah maha inaad isku cusleyso sababtoo ah sheygaas sidaas ayuu kuugu cuslaanayaa.

Howl kaa culusna maha inaad ka jeedsato, sababtoo ah waxay laga yaaba inay kuu dhib yareyso albaabo ay adagtahay in la furo kugusoonaa wajahan.

Markasta ka feejignow inaad tiigsato riyoooyinka xun-xun, iskana ilaali inaad la fikirto cadowgaaga nafsaddeed si uunan kuusiinin aragti xun. Ka dhabeynta Riyadaada waa dhaafida caqabadaha ugu xun ay noloshu leedahay.

Mar kasta udhowow dadka kaa caqli iyo aragti badan, si ay kuu siiyaan aragtiyo xawaare galinaya Naftaada .

Qaado waanadooda iyo Fikirkooda, Laga yaaba inay kaaga aqoon badan yihiin howshan.

Runtii way adagtahay inaad jaanqaadid keligaa, Sababtoo ah markaad keligaa tahay waxaa kaa hor imanaya wajiyo badan.

udhowow ruxaad isleedahay wuu Kaa caawin karaa wuuna kula fikiri doona si uu gaashaan kaaga noqdo Falaadhaha cadowga.

Sheeko Gaaban.

ugu horreyn sheekadan waa mid igu dhacdey Qoraa ahaan waana caqabad isoo wajahday.

Buuggii ugu horreeyey aan qoray oo ii ahaa tijaabadii iigu horreysey een go'aansadey inaan buggaag kale Qoro yaa waxaa igu dhacdey:

Annigoo wada buggii iigu horreeyey Qoriddiisa, waxaa ii yimid wiil saaxiibkey ah wuxuuna iweydiyey waxaan Qorayo, waan ujawaabey waxaana usheegay inaan Qorayo buug.

wuu isii weydiyey isagoo buugga Wuxuu ka hadlayo iweydiinaya,

Dabadeed waan usheegay inuu yahay buug sheekooyin ah.

wuu iska dhaqaaqey isagoo leh waxba kuuma faa'idaynayee ha isdaalinin.

Maalin dambe yaan Is aragnay wuxuuna iweydiyey halkaan marinayo buuggii.

waxaan ugu jawaabey waa gabo gabo.

Dabadeed Wuxuu isoo bandhigey inaan iska daayo isagoo iska dhigaya wax talooyin ila kaashanaya lehna "Maskaxdaadu wey yartahay mana gaadhin xilli aad wax qortee iska daa buuggan iyo hadallo kale.

Horta bandhigiisi yaan dib ugu noqday waxaana igu soo dhacey inuuna faa'iido laheyn buuggani oon iska daayo.

anigoo igu wareegayso maddeysaa buugga mise waa wadda ayaa waxaa ii yimid walaakey, Waxaana go'aansadey inaan isaga la kaashado arrinkan maadaama uu yahay Qof aan Aqoon uleeyahay.

waan usoo bandhigey anigoo usheegaya buugga warbixintiisa, wuxuuna isheegay inaan sii wado oon ujoojinin buunbuuninta dadka.

Illahey amarkii waan waday buuggii taladaa walaakey uu isoo gudbiyey ugu dambeyna waan dhameeyey.

inaad yeelataa dad ku dhiiri geliya kuna siinaya talooyin ku anfaca waa mid lagama maarmaan ah, sidoo kalena uu kuu yahay Doctor kaa daweynaya talooyinka khaldan ama sumaysan ay ku siinayaan cadowgaagu.

Inaad yeelata qof dhiirigeliye kuu ah Waa mid kaa caawinaysa inaad gaadho riyoooyinkaaga, sidoo kalena kuu sahleysa inaad Barri adigu noqoto dhiirigeliye adigoo raacaya wanaagiisii iyo afkaartiisii.

Faa'idada saaxiibka Wanaagsan.

Runtii mawduucan maha mid iiqorsheysnaa inaan kaga hadlo cutubkan, lakiin waa mid ay ila noqotay inaan ka hadlo maadaama ay ku dhex suganyihiin Waxyaabo badan.

Saaxiibka xun iyo saaxiibka Fiican Runtii waxaa udhexeeya farqi aad uweyn.

Tusaale:

Burushka (sponge) hadba sidaan unaqaano waa buush hadii biyo la dhex geliyo wuu soo qaadaya biyihii, markii la tuujiyana wuxuu sii daynaya biyihii gudihiisa ku jiray.

marka burushkaa hadii la dhex geliyo biyo wasakh saa'id ah, ugu dambeyn masoo deynayo biyo nadiif ah wuxuu soo deynayaa wixii gudiihisa ahaa ee uqarsoonaa.

Sidoo kalena hadii la dhex galiyo biyo nadiif ah wuxuu soo deynayaa biyihii nadiifta ahaa ee ku jiray.

saaxiibka xun iyo Ka wanaagsanna waa sidaas oo kale waxa gudahooda ku jira waxaad arki markaad ubaahato.

Saaxiibka xun waa mid ku tusaya waji wanaagsan iskagaana dhigaya qof kugu kalsoon, lakiin maha sidaas.

Ha dareemin dareen saaxiibtinimo adigoo og inaad ka sareyso saaxiibka.

Maanta waxaad tahay Qof raadinaya aragtiyo ku Anfaca oo dadka wareysanaya, barrina waxaa kuu iman Qof raadinaya aragtiyo anfaca kulana kaashanaya fikirkiisa, Marka Waligaa marnaba hku Qoslin Qof kuu sheegay hammigiisa hana yasin laga yaaba inaad dhaawacdo. Qofka kasoo dhex xushay dadka waa qof kaa yaqaana dadka oga inaad tahay saaxiib Wanaagsan, marka ka feejignow inaad iska beddashi sida uu kugu yaqaano saaxiibkaa.

Mar walba ahow sidaad Aheyd markaad la joogto saaxiibadaada.
Ha noqonin mid fir-fircoon markaad la joogto saxiibadii, markaad la joogto reerkana ah mid xidh-xidhan.

in lagugu barto hal dabeecad waa midda kuu sahleysa inaad noqoto saaxiib dhab ah, lakiin inaad yeelato marba waji waa mid kaa fogeynaysa saaxiibada Wanaagsan kuuna soo dhaweynaysa saaxiibada xun.

Mar kasta saaxiibada isku day inaad ufurto wajiga, sababtoo ah waxay kuu furayaan albaabo, lakiin haddaad ka aamusto iyaguna way ceshanayaan fikradahooda.

Saaxiibka wanaagsan waa mid laga garto saaxiibada kale, waa mid fur-furan, Waa mid fir-fircoon, waa mid leh aragti dheer marnaba aan ku fikirin inuu dib kuu celiyo, waa mid kula wadaagaya wanaaga si aad uhshaan maqaam sare dadkana aad uga duwanaataan.

saaxiibka Wanaagsan waa mid la socda markasta xaaladda aad ku sugantahay, waa mid ku garab taagan aragti iyo maqnaanshaba, waa mid kaa fikiraya markuu kaa maqan yahay isagoo ka cabsanaya inaad ka leexato waddada, waana mid kula fikiraya markuu kula joogo si aydaan ukala hadhin una noqotaan dad leh ku dayasho.

Saaxiibka Wanaagsan waa mid kula jooga had iyo jeerba xaadir iyo maqnaashaba, si uu kaaga ilaaliyo sunta saaxiibka xun iskuna dayaya inuu noqdo daawada suntaas.

waa mid aan ogalaaneynin in si dhib yar lagu badalo maskaxdaada, waa mid kaa caawinaya howlahaaga si uu uyeesho Qof leh saaxiib fiican, Qofkaasna waa adiga.

saaxiibka Wanaagsan kama suurtoowdo in isaga oo ku jira barwaaqo iyo farxad aad adigana ku jirta murugo iyo dhib.

Waa mid kula barwaaqeysan hadaad barwaaqo ku jirto, waana mid kula faraxsan hadaad farxad ku jirto, waa mid kula dhibaateysan hadaad dhibaato ku jirto, waana mid kula murugeysan hadaad murugo ku jirto.

Kuwaasi waa calaamadaha saaxiibka Wanaagsan, Waxaana lagaaga baahanyahay inaad yeelato saaxiib leh dhamaan calaamadaha aan soo sheegay, Sidoo kalena kuu noqda weheliyaha guusha.

Xilligan aan joogno ama Zamankan aan joogno waa mid ay adagtahay inaad hesho saaxiib wanaagsan, sababtoo ah kii wanaagsanna waxaa haleeyey kii xumaa wuxuuna ku riday ceelkii mugdiga waana sunta dhabta ah ee saaxiibka xun.

Markaad sameysanayso saxiib Wanaagsan waxaad fiirisa dhamaan dabeecadihiisa, adigoo Dabagalaya ficiladiisa si aadan ugu khaldamin. Waxaad siisaa maskaxdaada wakhti si ay uga fikirto inuu saxiib fiican iyo mid xunba.

Markaad ogaato inuu yahay qof aad ku kalsoonaan karto, isku day inaad soo dhaweysato adigoo kusoo dhaweynaya ficiladaada aad uleedahay haybadda iskuna day inaad ka saarto sunta saaxiibada xun.

Soo koobidda buugga "Hayaan " Qeybtiisa kowaad.

ugu horeyn aan ku horreyno waa maxay Nolol? waana maxay Naf?

Runtii dad qaar waxaa laga yaaba ineyna kala saari karin farqiga udhexeeya Nolol iyo Naf .

Noloshu waa maalmo nololeedka Bani'aadamka ee isbaddalaya, waana hadba siduu ugu nool yahay noloshaan addunyo haddey rafaad iyo haddey tahay barwaaqaba.

Naftuna waa ruuxda Bani'aadamka ku jirta uu Eebe S.W ku afuufey si uu noloshaan adduunyo uga shaqeysto uguna ahaato sidii shidaalka uu gadhigu ku socdo oo kale.

Qofku haduunan laheyn Naf ma yeelan karo Nolol waana labo isku xidhan ooy lagama maarmaan tahay in mid kamid ah la waayo.

Qofku haduunan laheyn Naf uma suurto gasheen inuu adduunkan yimaado isagoo Naf la'aan ah uuna socdo isagoo naf la'aan ah. Waana sababta uu Eebe S.W inoogu nimceeyey naftaa uuna nooga dhigey amaano uu nagu amaanaystey, ay waajib tahayna inaan kasoo baxno amaanadaas.

Haddaan intaa kaga baxno farqiga udhexeeya Naf iyo Nolol, waa maxay Fahamka Noloshu?

Nolosha aad marba ku sugantahay waxaa mudan inaad fahanto, sababtoo ah waxaa kuu suurto galaya inaad Nolol usii gudubto. Waxaan uga jeedaa, Hadaad ku sugantahay Nolol xun waxaa fiican inaad garato nolosha aad ku jirto, sidoo kalena aad qaadata go'aan aad kaga bixi karto nolosha xun ee kuu horseedaysa inaad gudan weydo Amaanadii Eebe S.W.

Way dhib yartahay inaad fahanto ujeedada lagu abuuro, sidoo kalena wey fududahay inaad fahanto nolosha aad ku jirto. Sidoo kale waa inaad ka hortagtaa caqabadaha kusoo wajahaya, hadaadan ka hortagi karinna isku day inaad dulqaadan karto intaad ka baxayso Caqabadahan.

Dhamaan waa inaad ka talaabsataa laamaha Nolosha xun, iskana ilaalisa inaad ku dhex kufto si aynan kuu hakinin. hadaad ku dhex kufto waa inaad tahay qof markaaba kasii kici kara siina wadi kara dariiqii uu hayey. waa inaad isku deydaa inaad fahanto ujeedka aad ka leedahay noloshaada, kadibna aad isku deydo inaad dhaqaajiso ujeedkaaga . Hadii aadan xawaareynin oo aadan barin Naftaada xawaaraha aad ku soconayso, Naftaadu waxay noqonaysaa mid aayar soconaysa caqabadna kugu noqonaysa inaad durba gaadho ujeedkaaga.

waa inaad dariiq walba oo saxsan aad umartaa si aad uga gudubto nolosha luudeysa.

Ha isku deyin inaad ka laba labeyso go'aanka aad qaadata, mar walbana yeelo go'aan adag ood maranaba ka noqonin.

Ha ahaado go'aankaadu mid ay cashir ugu sugantahay dadka aan laheyn go'aamada wax ku oolka ah.

saacad walba iyo daqiiqad walbana waa inaad iska dareenta Isbeddel ka duwan kii shalay, Naftaadana aad ku boorrisaa yoolka aad usocoto iyo raadinta nolol leh wax ka qabad iyo Isbeddelba.

waa inaadna iska ilaalisaa inaad noloshaada ku salayso ficillo xun, iskana dhowrto waxyaabaha kuu horseedaya Ficilada Xun, kana fogaataa kuwa kuu keenaya.

Markasta Naftaada uhogaami dhanka wanaagu ku jiro, sababtoo ah waxay kuu sahleysaa inaad yeelato nolol wanaagsan.

Waxaa jira siyaabo badan uu cadawgu kuugu soo xareyn karo ficilada xun, waa inaad iska xidhaa albaabada ay kaaga soo galayaan xumahaas aadna furataa albaab uu kaaga soo galayo wanaagu.

Waa inaad yeelata dareen iyo maskax aad ku ogaanayso waxyaabaha kusoo wajahaya ee ku saabsan cadowgaaga.

Waa inaad joogteysaa waxyaabaha kaa caawinaya inaad si dhakhso ah uga baxdo noloshaan, iyagana ka dhigtaa waxyaabo kuu ah joogto.

Waa inaad markasta ood howl qabanayso xusuustaa Eebe S.W hadaad ku jirto dhibaato iyo hadaad ku jirto barwaaqoba.

Siduu inoo sheegay Rasuulku N.N.K.H " **illaahay garo markaad barwaaqada ku sugantahay, Eebena wuxuu ku garan markaad dhibta ku sugantahay**".

Howl gal aad qabanyso adigoonan Eebe S.W talo saaranaynin, howl gal suurto gal ah ma noqonayo, sababtoo ah waxaad illoowdey meeshii ugu muhiimsaneyd ee laga bilaabayey.

Howlgalka aad waddo hadaad rabto inuu noqdo howlgal watta guushiisa iyo samotabixiisa waa inuu wattaa xidhiidhka Eebe S.W.

Sidoo kale waxaa lagaa doonayaa inaad ka fogaato waxa kaa fogeynaya Eebe S.W, aadna ka dhowrsanaanta xumaanta oo dhan, sidoo kalena ay ka noqotaa agtaada mid reeban.

Waa inaad sameysaa dhamaan waxa wanaaga ah ee Eebe S.W kuu dhaweynaya deyrna kaaga noqonaya xumaanta middeeda qarsoon iyo middeeda muuqataba.

Agtaada ha ka ahaado wanaagu mid sarreeya meel walba ood ku sugantahay, siyaabahaas yaaka caawinaya Horumarinta Naftaada.

Waa inaad ka fogaata waxyaabaha kuu keenaya inaad ka hadho hadafkaaga, sida dadka niyad jabka badan ama moraal xumida badan. Dadka noocaas ah ay agtooda ka tahay moraal xumidu dabeecad waa inaad ka fogaata oo aadan udhawaanin amaba soo dhaweysanin iyagu, sababtoo ah waxay rabaan inay soo saaraan dad iyaga lamid ah oo niyed jabiya dadka wanaaga raadinaya una soo dhaweynaya dhanka xumaha.

Naftaadu waa inay noqotaa mid horumar leh, kana muuqato mid leh yool sare.

Horumarinta Naftaada waxay qeyb ka tahay Horumarinta Noloshaha, Haddey hormarto Naftaadu noloshaaduna waa mid horumareysa, waxayna noqonaysaa Nolol ka dhisan meel walba.

Haddii aad dooneyso inaad noloshaan adduunyo ka guuleysato waa inaad ka tallaabsataa lixda(6) tiir ay leedahay saboolnimadu, kuwaas oo kale ah :-

- **Wahsiga.**
- **Hurdada tirada badan leh.**
- **Isdhigashada.**
- **Howshii maanta ood Barri ubaajiso (Baajin).**
- **Baqaha aad ka baqayso Is-beddelka nololeed.**

Tiirashaa aan kor kusoo sheegay ayaa waxaa la dhaha Tiirasha faqriga waana kuwa had iyo jeer masuulka ka ah dib udhaca nololeed ee ku dhaca qofka Bani'aadamka ah.

Waxaa jira waxyaabo badan oo saameynaya noloshaada, waana waxyaabaha diidan horumarkaaga.

Wakhtigan aan joogno waxaad maqlaysaa ruux ku leh waxaad ka xuntahay horumarkayga, waxaana laga yaaba inaad siisey talo anfaceysa. Ha waanin qof xun sababtoo ah wuu kula yaabayaa, laakiin waxaad waanisaa qof fiican sababtoo ah wuu kusoo dhaweynayaa qofkaasi.

Horumar hadaad maqasho ha uqaadanin qof ku waaninaya inuu horumarkaaga ka xun yahay, lakiin wuxuu ka fikirayaa inuu wanaagsanaado horumarkaagu.

Noloshan adduunyo waa mid lagu tartamayo, laakiin Eebe umbaa garan cidhibta ay ku dambeynayso, laakiin markasta waxaad dhowrtaa heer sare. Kalsoonida naftaadu ha badnaato si aad uga kaaftaanto Bani'aadamka, naftaaduna ay barato waxtarka keliga ah. Isku day inaad wax walba adiga qabsato waayo waxaa kaa baxaya ku tiirsanaanta dadka iyo inaad iyaga wax ka sugto.

Ahow qof caqli badan iskuna day inaad la socoto waxa ay dadku kuu sheegayaan, laga yaaba inuu yahay wax naftaada horumar la'aan ka dhigi kara. Weligaa ha caddeysanin guuldaradaada, sababtoo ah waxay fursad utahay cadowgaaga.

Meel walba ood tagto ama shaqo kasta ood qabatid kaga tag raad, waxaa kaa dambeeya jiil wadada aad martay iyaguna maraya.

Noqo qof hadal yar, sababtoo ah hadalka badan wuxuu tirtirayaa/ masaxayaa xikmadahaaga, dabadeedna waxaad noqon qof la karaaheysanayo hadalkiisa aana la maqleynin.

Ahow qof Wanaagsan sidoo kalena leh ku dayasho, si aad tusaale ugu noqoto dadka kale.

marka aad go'aan qaadata ku adkeyso go'aankaaga, sababtoo ah waxaa laga yaaba inuu wax ka baddalo go'aankaagani dunida. Naftaada ha ahaato mid keliya ku tashaneysa Eebe si ay uga fogaato dulsaarnimada.

Isku day inuu hadalkaagu wanaagsanaado si uu saameyn ugu yeesho dadka kale.

Iska indhatir dhamaan xumaanta si aanan garab lagaaga dhigin xumaanta.
Isku day inaad ka aamusto dadka diidan horumarka Naftaada, sababtoo ah waxay diidanyihiin inaad kor marto iyaga dabadeedna aad unoqoto tusaale ay ku daydaan.

Nafta myaa la maamulaa mise iyadaa ismaamusha?

Naftaada hadaad barto iney iyadu ku maamusho, waxay kugu ridi kartaa ceelal dhaadheer oo aadan kasoo bixi karin.
Naftaada ha noqoto mid ku soconaysa amarkaaga ayna noqotaa mid ay ka muuqato ad-adeyg iyo daganaan, waa sababaha kaaa caawinaya guusha.

Naftaada hadaad maamusho waxaad maamuli kartaa mustaqbalkaaga, mustaqbalkaaguna wuxuu noqon mid wanaagsan.
Haddii ay ku maamusho, waxaa macquul ah iney faraha kuu galiso, mustaqbal buriyayaasha sidaasna aad ku noqoto mid laga guuleystey.

La soco Qeybta labaad(2).

...

wixii aragti bixin ah kusoo dir :-
E mail: khaaliddayib14@gmail.com.
© All rights reserved.